



## Mashruuca Nidaamyada Biyo-mareenka Dabiiciga ah ee Waqooyiga Thornton wuxuu imaanayaa xaafadaha Lake City!

SPU waxa ay ku rakibi doontaa nidaamka biyo-mareenada dabiiciga ah ee dariiqyada dadweynaha ee xaafadaha Lake City. Mashruucani waxa uu wanaajin doonaa tayada biyaha ee Thornton Creek waxana laga yaabaa in uu faa'iidooyin kale u keeno Bulshada Xaafadda.

### ASALKII HORE EE MASHRUUCA

In ka badan 12 milyan oo rodol oo wasakh ah ayaa lagu qaadaa sakhadaha biyaha kuwaso noqonaya qulqulka biyaha dabaylaha sannad kasta. Biyaha duufaanta ah ee ku soo dhaca sagxadaha adag ee xaafaddaada-sida saqafka, jidadka, iyo meelaha baabuurta la dhigto-waxay soo qaadi karaan wasakhda waxyeelada leh ka hor intaysan ku dhicin Thornton Creek, taasoo ku qulqulaysa harada Washington oo ugu dambeyntii soo gelisa Puget Sound. Wasakhowga wuxuu dhaawici karaa kalluunka, duurjoogta, iyo habka bayadda.

Mashruucani waa qayb ka mid ah Barnaamijka Iskaashiga Nidaamyada Biyo-mareenka Dabiiciga ah, kaas oo u dhisa Biyo-mareenka dabiici ah Bulshada si ay:

- Iskaga yareeyan wasakhda Thornton Creek iyo Lake Washington
- U keenaan faa'iidooyin kale bulshada, kuwaas oo laga yaabo inay ka mid yihiin dhimista arrimaha biya-mareenka, dejinta gaadiidka, geedaha, iyo dhirta oo la kordhiyo.



Tusaalaha habka biyo-mareenka dabiiciga ah ee la dhammaystiray ee waddo la deggan yahay.

### WAA MAXAY NIDAAMYADA BIYO-MAREENADA DABIICIGA AHI?

Nidaamyada biyo-mareenka dabiiciga ah waa meel biyuhu maraan oo lagu dhisay garabka waddooyinka (meel bannaan oo u dhaxaysa cidhifka dariiqyada iyo khadadka guryaha). Waxaa lagu buuxiyay ciid gaar ah iyo dhir si ay si ku meel gaar ah u xajiyaan oo ay u daaweeyaan biyaha dabaylaha ee wasakhaysan ka hor inta aan lagu sii dayn dooxooyinkayaga.

### SIDEE AYAY U SHAQEYYAAN NIDAAMKA BIYO-MAREENADA DABIICIGA AH?

- 1** Inta lagu jiro waqtiyada roobka, biyaha dabaylaha ee ka yimaada sagxadaha adag ee xaafaddaada waxay ku shubmaan nidaamka qulqulka dabiiciga ah. Lakabka dhirta iyo ciidda ee habka Biyo-mareenka dabiiciga ah ayaa shaandheeya oo daaweeya biyaha dabaylaha, oo ka saara wasakhowga.
- 2** Biyaha dabaylaha ee la sifeeyay waxay soo galaan dhulka ama waxay ku sii daataan nidaamka qulqulka hoose.
- 3** Nidaamka Biyo-mareenka dabiiciga ah waxaa loogu talagalay inuu hayo ilaa 12 inji oo biyaha duufaanta ah inta lagu jiro dhacdooyinka roobabka culus. Biyaha duufaantu waxay ku daadan doonaan ciidda ama nidaamka qulqulka rasmiga ah 24 saacadood gudahood ka dib marka ay dhacdada roobabku dhamaato.



## FAA'IIDOOYINKA BULSHADA

Marka laga soo tago tayada biyaha dabaylaha oo la hormariyay, nidaamyada Biyo-mareenka dabiiciga ah waxa laga yaabaa inay u keenan faa'iidooyin badan xaafadaha iyo nidaamyada deegaanka, oo ay ku jiraan:

- Dhir badan iyo kala duwanaanshaha dhirta
- Dhibaatooyinka biyo-qaadka deegaanka oo la yareeyo
- Nidaamyada bey'adda oo caafimaad-qaba
- Badbaadada dadka lugaynaya iyo dhaqdhaqaaqa oo la hagaajiyay
- Dhirta waddooyinka oo siyaada

## GOOBAHA MASHRUUCA

SPU waxay ka dhisi doontaa nidaamyada biyo-mareenada dabiiciga ah laba goobood oo ku yaal xaafadaha Lake City:

### Little Brook

- 32nd Ave NE inta u dhexeysa NE 135th St iyo NE 137th St

### Olympic Hills

- 25th Ave NE inta u dhaxaysa NE 127th St iyo NE 130th St
- NE 127th St inta u dhaxaysa 25th Ave NE iyo 27th Ave NE
- 27th Ave NE inta u dhaxaysa NE 125th St iyo NE 127th St

## JADWALKA MASHRUUCA

2024 iyo 2025, waxaanu sii wadi doonaa ururinta warcelinta oo aanu la wadaagno bulshada wixii ku cusub, dhamaystirno naqshadaynta mashruuca, oo aanu shaqaaleysiino qandaraasle. Waxaan filaynaa in dhismuhu bilaaban doono 2026-ka. Jadwalkani wuu isbedeli kara inta uu mashruucu socdo.

## KHARIIDADDA MASHRUUCA



### CALAAMADAHA KHARIIDADA

- Waddooyinka loo xushay biyo-mareenka dabiiciga ah
- Beeraha nasashada

*Khariidaddaani waxay tusinaysaa meelaha loo xushay hababka Biyo-mareenka dabiiciga ah. Waxaan daraasaynay meelo ka badan oo aan halkan ku sawirnayn.*

We are building natural drainage systems at two locations in the Lake City neighborhood. Please call Wan-Yee Kuo, the project manager, at (206) 684-3957 if you would like more information about this project.

በሌክ ሲቲ ሰፈር ውስጥ በሁለት ቦታዎች ላይ የተፈጥሮ የፍሳሽ ማስወገጃ ዘዴዎችን እየገነባን ነው። ስለዚህ ፕሮጀክት የበለጠ መረጃ ከፈለጉ እባክዎን የፕሮጀክት ሰራተኛ ለሆነው Wan-Yee Kuoን በ (206) 684-3957 ይደውሉ።

Estamos construyendo sistemas de drenaje natural en dos ubicaciones en el vecindario de Lake City. Por favor, llame a Wan-Yee Kuo, gerente del proyecto, al (206) 684-3957 si desea obtener más información sobre este proyecto.

Lake City 지역의 두 곳에 자연 배수 시스템을 구축할 것입니다. 이 프로젝트에 대한 자세한 정보를 원하시는 경우, 프로젝트 매니저인 Wan-Yee Kuo에게 (206) 684-3957로 전화해 주십시오.

Мы сооружаем системы естественного дренажного отвода природной воды на двух участках территории района Lake City. Если вы хотите получить дополнительную информацию о данном проекте, пожалуйста, позвоните руководителю данного проекта, Wan-Yee Kuo, по телефону (206) 684-3957.

我們正在湖城市 (Lake City) 附近的兩個地點建造自然排水系統。如果您想了解更多有關本工程的資訊，請撥打 (206) 684-3957 與工程經理 Wan-Yee Kuo 聯絡。

Waxaan ka dhisaynaa nidaamyada biyo-mareenada dabiiciga ah laba goobood oo ku yaal xaafadaha Lake City. Fadlan wac Wan-Yee Kuo, maareeyaha mashruuca, lambarka (206) 684-3957 haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruucan.

Chúng tôi đang xây dựng hệ thống thoát nước tự nhiên tại hai địa điểm trong khu phố Lake City. Vui lòng gọi cho Wan-Yee Kuo, người quản lý dự án, theo số (206) 684-3957 nếu quý vị muốn biết thêm thông tin về dự án này. እብ ከባቢ ሌክ ሲቲ እብ ዚርከቡ ክልተ ቦታታት ተፈጥሮአዊ ስርዓታት መወገዲ ፈሳሲ ነገንጽ ኣሎና። ብዛዕባ እዚ ፕሮጀክት እዚ ከያዳ ሓበሬታ ክትረክብ እንተ ደሊኻ ብክብርትኻ ነጥ ኣካያዲ ሰራሕ ፕሮጀክት ከኹነ Wan-Yee Kuo ኣብ (206) 684-3957 ደውለሉ።

نقوم ببناء أنظمة الصرف الطبيعي في منطقتين ضمن حي ليك سيتي. يرجى التواصل مع السيدة وان-يي كيو، مديرة المشروع، على الرقم (206) 684-3957 للحصول على المزيد من المعلومات حول هذا المشروع.

Suaalo? La xiriir Adeegyada Dadweynaha Seattle

Wan-Yee Kuo | Maareeyaha Mashruuca

wan-yeeku@seattle.gov | (206) 684-3957

Wax badan ka baro oo iska diiwaan geli wararka mashruuca: [www.seattle.gov/utilities/norththorntonnds](http://www.seattle.gov/utilities/norththorntonnds)



Seattle  
Public  
Utilities